


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa



Boqorkii
Xikmadda ee
Sulaymaan



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.


Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Boqor Daa'uud nin Ilaah oo weyn buu ahaa. Xilgii
xukunkiisa lagu jiray, Reer Binu Israa'iil toban jeer
bay laba jibaarmeen oo tarmeen markii loo eego
boqrtooyadii boqor Saa'uul xiligeedii.



Laakiin iminka waxba ma sii xukumi karo. Daa'uud
wuu gaboobay. Wuuna daalay! Wuuna bukay,
noloshiisa duniidana way soo gabagabowday oo
wakhtigiisii baa soo dhowaaday.








Wiilashii badnaa ee
Daa'uud midkood oo
Adoniiyaah ahaa ayaa reer
binu Israa'iil u sheegay inuu
hadda boqor noqon doono.
In kasta oo magaciisa macnihiisu
yahay "Rabbigu waa Ilaah",
Adoniiyaah ma ahayn nin
wanaagsan. Wuxuu isku dayay
inuu carshiga xado, isagoo og
inuu Daa'uud aad u dacif
ahaa oo uusan isaga iska
caabin karin. Laakiin
Ilaahay wuxuu lahaa
qorshayaal kale!



Daa'uud xaaskisii Batshebac way
ogayd inuu wiilkeeda Sulaymaan
boqor noqon doono. Waxayna
Daa'uud u sheegtay waxyaalo
ku saabsan qorshaha
Adoniyyaah. Daa'uud wuxuu
isug yeedhay odayaashii
reer binu Israa'iil oo wuxuu
si waadax ah ugu dhawaqaqay
inuu Sulaymaan ahaado
boqorka reer binu Israa'l.



Sulaymaan wax dhib ah sii fog kuma qabo Adoniiyaah, sababta oo ah dadkii reer binu Israa'iil waxay aaminsanaayeen Daa'uud. Daa'uudna wuxuu u sheegay iyaga in kan uu Ilaah u doortay inuu noqdo bogorkooda yahay Sulaymaan. Inyar ka dibna wuu dhintay Daa'uud.




Intii uusan dhiman ka hor Daa'uud, wuxuu la hadlay oo uu u sheegay Sulaymaan waxyaalaha ku saabsan addeecidda daacadnimada Ilaah iyo inuu noqdo boqor wanaagsan.

"Jidatka Ilaah ku soco, inaad ku liibaanto waxa aad samaynaysid oo dhan." Daa'uud baa sidaa ku yidhi wiilkiisa. Taasi waano fiican bay ahayd! Deedna Sulaymaan wuxuu ku fadhiistay kursigii saldanadii Aabbihi, Daa'uud, oo boqrtooyadiisii baa loo xaqijiyeey uskankeedii.



Habeen baa, Sulaymaan
riyooday. Riyadiisana,
Ilaah baa ugu muuqday
oo ku yihdi isaga,
"I weyddiiso wax
aan ku siiyo?"

Maxaad
weyddiisan
lahayd ka
adiga ahaan?



Sulayman wuxuu weyddiistay xikmad
waxgarasho oo uu ku noqdo boqor
wanaagsan. Boqorkii
dhalinyarada
ahaana
codsigiisii
waa la yeelay.




Wakhti bandanna ma aysan sii qaadeen kolkii ay dadkii garteen xikmadda Sulaymaan. Maalin baa, labo silaamood oo hooyooyin ah iyo ilmo keliya horyimadeen Isaga. "Naagtan ilmaheedii habeenkii buu dhintay, Maxaa yeelay iyadaa ku dul seexatay,"




Naag baa sidaa tidhi. "Maya Saas ma aha! Laakiinse kan nool waa wiilkayga, kan dhintayna waa wiilkaaga," Naagtii kale ayaa sidaa tidhi. Sidee boqorkii ku u sheegay hooyada runta ah tay tahay?



Dabadeed boqorkii baa wuxuu yidhi, "Bal seef ii keena" deedna waxay u keeneen seef boqorkii. Maxaad u malaynaysaa inuu qorshaha uu damacsan yahay seefta wuxuu ku samaynayo?




Oo boqrkii wuxuu yidhi, "Ilmaha nool laba u kala qaybiya, oo middood badh siiya," dabadeed hooyadii ilmaha noolaa ayaa tidhi, "Sayidow wiilka nool iyada sii, laakiinse sinaba ha u dilin isaga."





Laakiin tii kale waxay tidhi,
"Aniga yeelan mayo, adna
yeelan maysid ee qaybi."






Deedna boqrkii wuxuu
yidhi, "Wiilka nool naagtii
hore siiya, waa hooyadii."
Oo dadkii dalka Israa'iil
oo dhamuna way wada
maqleen xukunkii boqorka
wax ku xukumay, wayna ka
baqeen boqorkii. Maxaa
yeelay, way arkeen in
igmaddii Ilaah ku jirto
si uu wax u xukumo.



Dadkii dalka Israa'iil ma aysan
lahayn macbud ay Ilaah ku
caabudaan. Kolkii uu Daa'uud
qorsheeyay inuu mid u dhiso, Ilaah
baa ku yidhi, "Wiilkaagaa dhisi
doona guri magacayga dartii."




Deedna Sulaymaan
wuxuu bilaabay dhismo
macbud cajiib ah inuu
ka dhiso Yerusaalem.




Waxayna ku qaadtay
toddobo sanadood oo
dhan inuu dhiso macbud.
Laakiin maalintii
weyneyd markay timid
dadcii oo idil baa isku
soo ururay inay
maqlaan

Sulaymaan u huridda
macbudka Ilaah.





Salaad qurux badan
dabadeed, boqrkii iyo
dakisisii si farxad lehn
bay u bixiyeen
waaqdhaacyo
iyo waxaa

dhacday xaflad
weyn in wax lagu cuno
muddo laba toddobaad
gaaraysa.




Kolkaa ka dib, Ilaah baa
u muuqday Sulaymaan
marlabaad oo ballan ku
siiyey inuu barakadeeyey
isaga iyo Israa'iilba inta ay
iyagu sii wadaan adeecidda


Rabbiga.



Nasiib darrese, ha nodo Sulaymaan ama dadkiisa Israaiil toona ahayd inay adeecaan marwalba Ilaah. Boqorkii wuxuu guursaday naago badan oo uu Ilaah doonaynin inuu guursado. Naagihuusi cawaanta majuusiyiinta ahaa ayaa qalbigiisa u qaatay Ilaahyadii qalaad, oo qalbigiisa daacad uma noqon Rabbiga Ilaahiisa ah, sidii qalbigii Aabbihi Daa'uud.



Markii uu Sulaymaan lumayay fursadii uu Ilaah
ku addeeci lahaa, mid ka mid aha saraakiishiisii
oo lagu magacaabi jiray Yaaraabcaam ayaa
haystay waaya aragnimo cajiib ah.



Nabi baa wuxuu u sheegay isaga in Ilaah kala
qaybinayo boqortooyada boqr Sulaymaan oo
Yaaraabcaam xukumi doona tobani ka mid ah laba iyo
tobanka qabiil ee reer binu ISraa'iil. Durbadiiba
Yaaraabcaam wuxuu u baxsaday dalka Masar. Wuuna
garanayay haddii uu joogo inuu
Sulaymaan dili doonay karay.



Ugu
dambayntii,
Sulaymaan
wuu
dhintay.

....

....

....

Wiilkiisii Rexabcaam, ayaa
canshuuray dadkii oo waliba
si ka sii daran tii Sulaymaan
ku sameeyey. Tobankii
qabiilood wey ka hor
yimaadeen - oo waxay
doorteen Yaaraabcaam
inuu hoggaamiye u
noqdo. Sulaymaan
boqrtooyadiisii waxay
u kala qaybsantay laba
garab, si la mid ah sidii
nabiga Ilaah sii sheegay.
Ilaahay ma barakeeyo
kuwa aan addeecin.



Boqorkii Xikmadda ee Sulaymaan

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Boqoradii Koowaad 1-12


"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



22



60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isagaogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

